



# KANTROOLKA KULAMADA SUUM( ZOOM) EE KA QAYB GALAYAASHA

## Fursadaha daawashada



Muuqaalka Gaaleri (Gallery) ayaa si siman uga duubi doona fiidiyow (Video) dhamaan ka qayb galayaasha.




Muuqaalka qofka hadlaya wuxuu muujin doonaa qofka dhabta ah ee hadlaya oo ka soo baxay daaqad weyn.

**Fiiro gaar ah:** Telefoonada casriga ah iyo taabletyada (tablets) muuqaalka qofka hadlaya ayaa awood la siinayaa marka lagu biirayo kulanka Suum (Zoom). Far keliya shaashadda ugu jiid dhinaca bidix si aad u gasho muuqaalka gaalery (gallery). Afar fiidiyow oo keliya ayaa soo muuqan doona markiiba.


## Kantoolada Kulanka

### Maqalka

Dooro badhanka maykarofoonka si aad u aamusto iyo/ama aamusnaanta aad uga baxdo.




Maykarofoonka waa la **Aamusiiyey**




Maykarofoonka waa laga saaray **Aamusnaanata.**

### Fiidiyoo

Dooro badhanka ka shaqaysiinta iyo/ama joojinta fiidiyowgaaga.




Fiidiyow wadaag ah




Fiidiyow aan la wadaagin

## Badhanka ka qayb-galayaasha





Dooro si aad u fiirsato liiska dhamaan ka soo gayb-galayaasha kulanka. Dooro badhanka mar la-baad si aad liistada u qariso, ama dooro bened.

## Badhanka wada hadalka




Dooro si aad u furto sanduuqa wada hadalka, mar kale dooro badhanka si aad shaashada uga saartid sanduuqa wada hadalka, ama dooro bened. Fariin ku qor sanduuqa wada hadalka si dadku dhammaan u arkaan, ama dooro fallaarta hoos u dhacaysa ee dhinac taal Ku (To) si aad fariin gaar ah ugu dirto qof gaar ah.

## Falcelinta




Si aanad u carqaladayn qofka hadlaya, u isticmaal fal celinta emoji (emoji) xidhiidhka aan hadalka ahayn. markaad adeegsato badhanka Gacan Taagista wuxuu u sheegayaa qofka hadlaya inaad rabto inaad hadasho.



Taabletyada (tablets), iPad-ka (iPad) iyo telefoonada casriga ah falcelintu waxay ku taal badhanka dheeraad.

## Ka bax kulanka



Si aad uga baxdo kulanka, dooro badhanka cas ee ka bax.



Daaqad cusub ayaa soo muuqan doonta, dooro ka bax kulanka.